# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 09:57 AM** **Hansard No.19/6** **07/10/2012**

**Dooda Motionka Wax kabadalka iyo kaabixta Xeerka Qareenada Xeer Lr.30, waxay socotay 1 maalin waxaa ka qayb qaatey 07 mudane.**

**Gudoomiyaha: -** Md. Baashe Maxamed Faarax ayaa fadhigan Gudoominayay ka dib Furitaankii Quraanka wuxuu mudanayaasha ku wargaliyay inay Maanta Bilaabmeyso Dooda Motionka Wax kabadalka iyo kaabixta Xeerka Qareenada Xeer Lr.30 sidaa darteed dooda la isu diiwaangaliyo.

***Doodii Mudanayaasha:-***

1. **Md. Maxamud Jamac Cabdi: -** shirgudoonka iyo mudanayashuba way salaaman yihiin, waxyaabaha ay qorayaan Dastuurka iyo xeer hoosaadkuba ee ugu horeeya oo u astaana maamulka iyo inagaba waxa weeye, wixii astaana iyo documentiya ee uu leeyahay Goluhu in la ilaaliyo oo aan suuqa laga helin oo aan cidkale laga helin.

   **Qodobka 29^aad^** ee dastuurkaana qoraya, waxaa cajiiba motion uu soo jeediyay Goluhu oo aan wali la naaqishin, ayaa fulintii soo dhexgalaysaa intii aan golaha ku jiray wali maan arag tan oo kale, goluhu wuu curinkaraa sharci cid loolama jeedo waa dastuuri oo awoodii xeer-dejinta inay curiso xeerka, sidaa awgeed, waxaa halkan yaala oo laga hadlayaa waa motion aan soo jeedinay anigaana ah qofkii ugu horeeyay oo wali kameynaan doodin, sidee bay u gaadhay inay fulintu soo dhexgasho waa su'aal?.

   **Qodobka 20^aad^** ee dastuurka shaqadu waa waajib iyo xaq uu muwaadinku leeyahay, **Qodobka 22^aad^** nin waloo muwaadina wuxuu xaq u leeyahay inuu siyaasad, dhaqaale iyo shaqo intaba uu ka qaybgalo, **Qodobka 38^aad^** awooda ay leedahay Xeer-dejintu cid kale ma amaahin karto, sidaa awgeed, taasi waa mid aan ku durayo fulinta inay soo gasho hawlaheena innama ma galnoarrimahoodee, muwaadinku wuxuu xaq u leeyahay inuu kasbi xalaala oo uu shaqaysto uu helo sida **Qodobka 31^aad^** ee dastuurka, qaanuunkaa ogol oo dastuurka, ogol hadaanu muwaadinku ku xadgudbeyn sharciga iyo dastuurka, Xildhibaankuna muwaadinkuu ka mid yahay, xaq wuxuu u leeyahay inuu dhaqaalaha,

siyaasada iyo qolad murtidga ka shaqeysa Fanka iyo sugaanta uu galo, 7 Qodob ee aan sheegay xaq bay u siinayaan muwaadinka,, waa dastuuri.

***Sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa:-***

- Qodobka dastuuriga ah ee meesha yaala waxa weeye in qofka mushahar ka qaata oo u shaqeeya dawlada aanu mushahar ka qaadan meel kale oo dawlada ka mid ah, oo aanu qaadan mushahar laba hay'adood oo dawlada ka mida.

2. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** shirgudoonka iyo mudanayaasha Golaha intaba waan salaamayaa, Xeerkan wax ka badalka lagu sameynayo ee mudanayaashu soo jeediyeen, waa xeer markii hore si khaldan loo sameeyay oo halkan uga baxay, mabda'ahaan, sida dastuurka ku cad xeerarku nidaam sharciya ayay maraan oo ku hagmaan, xeerkan Law Lr.30/2004 waxaa ka muuqda dariiqii sharci ee sida caadiga ah xeerarku marijireen inaanu marin, isagoo xeer muhim ah oo nidaaminaya bahdii sharci ee garyaqaanada ahayd, ayaa waxaa dhacdey nasiib daro in sidii loo baahnaa ama Golaha uga baxay aanu u dhaqan galin, oo fadhiid buu noqdey, xeer aan dhameystirneyn nidaam ahaan, mabd'ahaana aan dhameystirneyn buu noqdey oo si deg dega loo sameeyay oo aqoonyahan sharciyaqaana ayna ka qaybgalin.

Waxaa ka muuqda inuu yahay 80%, habdhaqan iyo nidaaminta ruqsada oo kaliya, lama odhan kareyn inuu yahay xeer loogu talagaley inuu nidaamiyo oo uu dhiso ururkii qareenada oo dhismihiisu ka muuqdo, in nidaamkiisu ka muuqdo oo qareenada oo dhan ka muuqdaan, xeerkaasu markaa xeer noocaas ah ayuu ahaa, markii la istusey in Xeerku ay bulshadu aad ugu baahan tahay ayaa la arkey in wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyo, isla markaana, uu bulshada dhan ee Ururka qareenada wax qabta oo aanay iyana la daaq tagin sharcigii, wax u nidaamiya in loo helo ayaa lagama maarmaan noqdey, motionkaa ay mudanayaashu soo gudbiyeena waan waa faqsanahay.

Markaan gudagalo xeerka, wuxuu u baahan yahay xeerku in dhismaha ururka qareenada in xeerka lagu sameeyo, maamulkiisa, Awoodaha Gudoomiyha iyo Xoghayaha wax yaabaha ka dhiman ee in wax laga badalo weeyaan, iyadana mabaadiida guud ee xeerku ku dhisanyahay in lagu daro, tusaale ahaan, marka mihnad lagawaramyo in mihnadii lagu daro oo qeybo ka mida ay noqdaan weeye, in ururka qareenada madaxbanaani dhameystiran sida Komishanada aan sameyno inuu yeesho xasaanad oo wixii la doono aan laga yeelin weeye.

Qareenku waa garsoore taagan, madaama lagu magacaabo inuu garsoore taagan yahay, in la sameeyo oo uu xasaanadiisuu uu helo ayaa lagama maarmaan ah, waxaa iyana u baahan in qeexitaan lagu sameeyo oo xeerka ay ka muuqato Mihnada Qareenimada oo iyana qeexitaan sharciya loogu sameeyo, xeerka horena kama muuqan, iyadoo qodobo badan noqoneysa oo mar la taliye sharci yahay, marna heyn sharciyahay, marna adeege

sharci yahay, in waxyaabaha lagu qeexo oo aan hadhaw muran ka iman ayaa lagama maarmaan ah.

Iyana waxaa ka mida adeegsiga ama ku shaqeysiga mihnada qareenimada, waa sida dhakhtarka iyo injineerka oo kale oo wax meel ku hadha maaha, waxa kale sida dad badan u qaateen waax dawladii ka mid ah maaha oo shaqaale dawladeed ka mida maaha, dadbaa waxay u qaateen ku shaqeysiga qareenimadu inay ka mid tahay hay'adaha dawlada oo mushahar lagu qaato, markaa waxay la xidhiidhaa shakhsiga.

Sidoo kale in la cadeeyo waxaa u baahan qofka qareenka ahi wuxuu xidhiidh la leeyahay sharciga, madaama uu xidhiidh la leeyahy wuxuu leeyahay xuquuq, waxaana saran waajibaad, oo ilaalinta sharciga xuquuqna wuu ku leeyahay, waajibaadna waa lagu leeyahay, inuu si lacag la'aana mararka qaarkood u adeego waa waajibaadka saaran, waxaa kaloo waajibka saaran ka mid inuu u adeego si lacag la'aana waa waajibaadka bulshada iyo wadanka ka saaran, inuu ilaaliyo sharciga iyana waa waajib, markaa waa in xeerkan ay ka muuqataa oo uu wax ka yidhaahdaa.

Waxaa jira, qareenadu way badan yihiin, qareen shahaado sita oo heer jaamacadeed iyo wax ka sareeya sita iyo qof aan wali shahaado helin laakiin khibrad mudo ah leh, baa jira, had iyo jeer meelaha muranku ka yimaado oo aan xeerkii hore si fiican u kala cadeynayn, waxaa fiican in xeerkan lagu kala cadeeyo noocyada ruqsadaha ay qareenadu qaadanayaan iyo halka ay ka qaadanayaan lafteeda, iminka waxaa laga qaataa wasaarada Cadaalada, xeerkana waxyaabaha soo jeedimaha ku jira waxaa ka mida in Gudi la sameeyo oo iyadu maamusho, waxaa isweydiin leh maamulka ururka qareenadu maxay qabanayaan hadaanay iyagu awoodi kareyn inay qareenkii ku ilaaliyaan xeerkan isla markaana ruqsadii siineyn.

Anigu waxaan soo jeedinayaa run ahaantii, in sida ururada kale ee jira awoodaha xeerka lagu daro in isagu ama cida uu u wakiishaa ay ruqsada siin karto, waayo hadaynu nidhaahdo wasiirka cadaalada aynu hoosgeyno barituu digreeto soo saarayaa, marka ay isyar qabsadaan ruqsadii buu ka joojinayaa oo ka qaadayaa, markaa taasi meesha kuma jirto, waa in xeerka lagu daro in ururka qareenadu yeeshaan maamulka qareenada, haday cashuur noqoto, hadey ruqsad noqoto, ama dalacsiin in iyaga la siiyo ayaan soo jeedinayaa, qof soo dalbada waxaa fiican in uu la taliyo sharci soo dalbado xeerkii hore kuma jirin markaa waa inaan ku darsada, waxaa kaloo jira tababare sharci kuwaas dhami ma jirin, isna waa in lagu daraa.

Waxaa kaloo jira, oo xeerarka kale ku jira inay qaybsamaan qareenadu, Qareen daraja 1aad, mid darajada 2aad iyo mid darajada 3aad, ama sida kale Qareen Guud, inkastoo marka sida kale loo eego qareen dhamaan dhowr konton xeer ee dunida jira ka jawaabi

karaa majiro, markaa Qareenkaa guud su'aal baa saaran, laakiin qareen 3 maxkamadood ka hadli kara waa la sameynkaraa, in derajada la soo koobo ama qaab ka duwan loo sameeyo waayo wax ka badalka waxaa ka muuqda in ruqsaduhu u qeybsamayaan, dhowr qeybood, qaar la dhigay kuwo ka hadli kara ciqaabta oo kale, taasi waxay faaiido siinaysaa qareenka oo taa ka natiijo keeno oo xeerka ciqaabta guud uu si fiican uga hadli karo, marka xiga wuxuu isku dayay inuu qareenka guud hiigsado, markaa aad bay faa'iido u tahay in Qareenka la qaybqeybiyo oo xeerka lagu qeexo ama darejo ha lagu qaybiyo ama Gobol ha lagu qeybiyo ama Xeer halagu qabyiyee, tusaale ahaan qareen guud, qareen ciqaabeed iyo qareen shareeco oo shareecadu way badan tahay taa lafteeda la qaabeeyo.

Shirkadaha lawcomeda dalka way ku soo badanayaan, oo shirkadu badan baa jira, wax nidaamiya ma jiraan, dhinac wasaarada Ganacsiga ayay xidhiidh kala leeyihiin, dhinacna wasaarada Cadaalada iyo Hay'adihii garsoorka, markaa waxay u baahan tahay nidaam xeerka ku jira oo aan ku koobneyn ruqsad bixintee isaga lagftiisu Xeerku nidaamiyo lawcomeyada ayaa loo bahan yahay oo ay ku jirto, muranku wuxuu ka taagan yahay mar haday shirkad ganacsi taha xeerkan ma soo galayso, waxa iyana in xooga la saaro oo xeerka inay ka muuqato ay tahay, qaabka ruqsad bixinta iyo diiwaanada qareenimada iyadana in xeerka wax kaga xusnaadaan, oo nidaamkaa wax kaga xusnaadaan.

Waxaan ku soo gabagabeynayaa, waxaa u baahan in loo sameeyo gudi iyadu u xilsaaran, codsiyada, diiwaanglinta iyo la xisaabtanka qareenka laftiisa, qareenka laftiisu waa inuu dareema in la xisaabtan jiro oo cidi ka danbeyso, waxaa iyana ku jirin aqoonsiyada faylasha, waxaan jira, xirfada qofku leeyahay inuu ku shaqeysto weeye, dastuurkuna meel uu kaga reebayo in anigoo xildhbaana qareenimo qaataa ma jirto, waxaa had iyo jeer dadku ka hadlaan oo loo adeegsanayo qodob xeerkan ku jira, qodobka taariikhdiisa hadaan dib u raacno waa qodob qeexeetinkii xeernimo ka horimanaya, markaa waxaan leeyahay dastuurka mid ku jirta maaha, xeerkana in laga saaro weeye.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- In Xeerkan iyadoo cid gaara aan loo eegayn oo bahdii iyo ururkii qareenada inuu nidaaminayo in loo eego oo kaliya, oo marka arrimaha aan soo sheegay lagu daro
- la ansixiyo, waad mahadsantihiin.

3. **Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nacnac):-** salaam ka bacdi, salaan ka bacdi anigu xeerkan laba qodob baan ka soo horjeedaa, tan hore waxa weeye, sidii xildhbaankii iga horeeyay hadii ninka xildhibaana ee Xasaanada leh ee qareenka noqonaya ee halkaa isa soo taagaya oo aan wax lagu aamusin karaa jirin, taasi aan ka soorno xataa qareenkii ayuu qiimo ridayaa, markaa waxaan soo jeedinyaaa inaan taa ka saarno,

**Point of Order Md. M J Cilmi (Dable):-** Gudoomiye waxaan saxayaa qofka markuu joogo maxkamada sharciga u yaal halkaasuu ugu gooyaa waaranaka ninka deelqaaf maxkamada Gudaheeda ku sameeya, Xasaanadu dibada weeye.

**Md. Nacnac:-** Waxay weeye lama xidhi karo, la lamana hadli karo qofka xasaanada leh, waa inagu ceeb inaad dadkii afka qabano oo powerkeena exericisegareysno , qareenkii baa niyad jabaya, tan labaad, Ruqsada dawlada baa bixisa, lama odhan karo qayru sharci inaan nidhaahno ruqsada urur baa bixinaya.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- In laga saaro Xeerka labada Qodob ee in qofka Xasaanad leh sida Xildhibaanku uu Qareen noqon karo iyo in ruqsada urur bixin karo, oo ruqsada waa in loo daayaa dawlada ayaa bixin karta uune, waad mahadasantihiin.

4. **Md. Xuseen Ismaciil Yuusuf: -** shirgudoonka iyo mudanayaasha way mahadsanyihiin, Xeerkan dib la inoogu soo celiyay ee sidaada sanadood ka hor si khalkdan u baxay, ee lagu soo shaqeeyay, iminka la inagu soo celiyay si aynu u saxno, wax dhibaato oo ku jiraa ma jiraane waynu saxaynaa, wadadiisan wuu marayaa, in wax lakala jecleysotna ma fiicna ee waa in xeer-hoosaadka la ixtiraamo ayaa waajiba, anigu toos baan u galayaa xeerka.

**Qodobka 2aad** waxaan qabaa in loo ogolaado ha noqdo xildhibaan local Govermentga ah ama barlamaan ha noqdee inaan waxa u diidaya jirin inuu qareen noqdo dastuurkuna u diidi mayo hadaanu laba mushahar dawlada ka qaadaneyn, markaa waa loo ogolaadaa inuu xirfadiisa ku shaqeysto, Qodobka 3aad gudidda ruqsada bixinaysaa maxay tahay, qualificationkooda waxaa ila quman inay noqdaan niman loyerska ka cilmi sareeya oo takhasus loyernimo iyo mid ka sareysa iyo inay shahaado jaamacadeed haystaan ayaan ku daryaa.

**Qodobka 5aad F/3aad** halka ay ku jirto ***iyo cashuurta kale ee ku waajibtey***, waa tee cashuurtasi, si u cadeeyo cashuurtaas waxaan ku darayaa ***Iyo cashuurta ku waajibtey incomekiisa*** ayaan ka dhigayaa oo income tax ku daray, (Xarafka B) ee dada halka ***25ka***, waxaa ka dhigayaa ***45 jir*** waa inuu khibrad badan yeeshaa, halka imtixaanka la qaadanayo waa mid noocee, waxaan ka dhigaya ***Imtixaan qoraala iyo mid hadala*** si loo eego aqoonteedu intey gaadhsiisantahay. **Qodobka 7aad X/h,** waxaan ku kordhin lahaa halkaa ***waa inuu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsanyahay***, **Qodobka 8aad X/b**, dada waxaan ka dhigilahaa ***30***, halka ay 25 ka tahay,

**Qodobka 10aad,** halkan waxaa ku qoran ***Dhamaan darajooyinka maxkamadaha***, dee waa in la magacaabo, sida Maxkamda Sare, Maxkamada Rafcaanka, Maxkamada Gobolka darajooyinkooda halka lagu soo daro, **Qodobka 14aad** waxaan ku darayaa D, ha la ogeysiiyo qofka laga-laaley sharcigiisa maxkamada, si loo ogaado haduu shaqeysto

isagoo laga-laalay sharcigii, waxaan kaloo ku dari lahaa **F/4aad** sababaha lagu laali karo ruqsada qareenka hadii la ogaado in shahaadaduu ku shaqeysa tahay musawir, oo noqoto sabab lagu laali karo ruqsadii.

**Qodobka 16aad** waxaan ku dari lahaa **F/8aa** oo ah Wasiirku codsan karo oo u yeedhi karo iyo **F/9aad** oo in 5 xubnood oo gudida ka mid ahi u yeedhi karaa, ***Qodobka 19aad*** Xushmad baa ku qoran oo malaha loo jeedo kharashka adeega, markaa waxaan odhan lahaa ***kharashka adeega qareenka***, halka Xushmada, Qofka ajnabiga ee halka jooga maxkamad ka doodaya loyar dibada ah wuu qabsan karaa, halkaa waxaan ku dari lahaa iyo ***qofka haysta dhalasho ajnabi*** ileyn wuu qabsan karaa loyere, ***Xeer-nidaamiyaha*** waxaan soo jeedinayaa, in gudiddu soosaarto ee aanu wasiirku soosaarin, waad mahadsantihiin.

5. **Md. Cumar Axamed Saleeban (Sanweyne):-** shirgudoon waad mahadsantahay, anigu badinmaayo, dhawr qodob baan ka hadlaya, rayigayga sidey aniga ila tahay ayaan yara cadeynayaa, inagu xeer-dejinta hadaynu nahay hadii wax la inoo keeno meelkasta halaga keenee, in qodobadaasi dastuurka waafaqsanyihiin iyo halka ay ka soo galikaraan, wixii dastuurka ka hor imanaya in dibada la inooga saaro weeye, qodobkan la isku hayo wax weeye qareenku ma shaqayn karaa isagoo Mp ah, horta dastuurku wuxuu cadeynayaa inaanu qofku qaban Karin laba shaqado oo dawladeed, anigu jaamacad baan wax ka dhigaa laakiin shaqo dawladeed maaha.

   Arrinku ujeedaha nuxurka sharcigu waxaweeye, wakhtigii shacabka ama xukuumadu igu lahayd inaan shaqeyo oo halkan (session) jiro oo aan jaamacada ama maxkamad ka soo shaqeeyo waayo halkan mushahar baan ka qaataa, markaa wakhtiga umadu leeyahay ee halkan mushar laga qaato inaan meelkale ka soo shaqeeyo waa xaaraan sidaan u arko, laakiin wakhtiga qofku leeyahay meeshuu doono wuu ka shaqeyn karaa, waxaan kaloo xildhibaankii iga horeeyay ku raacsanahay qofka qareenka cida imtixaanka ka qaydeysaa waa inay ka (qualification) sareyso, ama la qualification ahaadaan, waa insult in qof ka shahaado hooseeya qof ka shahaado sareeya imtixaan ka qaado, waayo natural in qofna ogolaaneyn qof ka hooseeya ka qaado imtixaan, qareenimadu waa xirfad waa sida injineeringka oo kale.

   qareenku waa inuu intaas oo sanadood lahaadaa khibrad, inkastoo wadanka ay ku waryihiin qareeno institutional ah, laakiin yeelkeede, waa lakala saaraa qareenada oo la yidhaahdaa waa inuu intaas oo sanadood oo shaqeynayo ku noqon karaa qareen, waa in lakala saaraa qareenada waxaan ku raacsanahay xildhibaan xuseen sidoo kale, lacagta soo galeysa qareenada waa in la qeexaa income taxeskaa uu qofku bixinayo, intaas ayaan ku soo gabagabeynayaa, waad mahadsantihiin.

6. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** shirgudoonka iyo mudanayaashu way salaamanyihiin, horta marka hore kalmada qareen waa mihnad, mihnadna waa qof wuxuu xirfad u leeyahay oo ku shaqeysto, xildhibaanimadu mihnad maaha oo inteenaasi mihnado kala duwan baynu leenahay, sharciga mara laga hadlayo dee wada sharciyaqaano ma nihin, sharciyaqaano ma wada nihinm su'aasha dooda keentay waxa weeye qof xildhibaana oo barlamaanka Guurti iyo Wakiilo ku jiraa qareen ma noqonkaraa? Jawaabtu haa weey, tan Xasaanada ee laga hadlayo, anigu wax badan baa dhageystey dacwada ka socota maxkadamaha, dee raga xildhibaanada ee qareenada waxbadan baa taagnaa iyadoo laga saarayo, wax xasaanada oo halkaa ku leeyahay ma jirto, anigu markaa waxaan leeyahay ninka xildhibaanada inuu xirfadiisa ku shaqeysto sharci diidayaa mar jiro.

   **Qodobka 2aad F/1aad** ee la leeyahay Gudidaa shahaado siinayaa, in gudidu aqoontiisa soo imtixaanto inuu shuruudihii qareenka buuxin karo oo uu qareen noqon karto, laakiin shahaadaha in Xeer-ilaaliyuhu bixiyaan soo jeedinayaa, intaas ayaa ku darayaa, waad mahadsantihiin.

7. **Md. Maxamed Jaamac Cabdi:-** mudanayaasha sharafta leh iyo shirgudoonkaba waan salaamayaa, marka xiga waxaan sheegaya inaan ayidsanahay soo jeedinta mudanayaasha ee wax kabadalka iyo kaabista xeerka qareenada, marka laga reebo meelo yaryar oo ama laga Hadley ama aan isleeyahay wax ku kordhi,marka hore mudanayaal waxaan isaga jeclaa inaan bogaadiyo oo dastuurku u ogolyahay wasiirka golaha wuu iman karaa oo ra'yigiisa wuu ka dhiiban karaa, laakiin ra'yi wuxuu soo jeediyaa codna malaha, waxbadan buu soo jeediyay oo u baahan in laga tabagatago, horta qareenimadu waa mihnad in lagu shaqeystona wax diidayaa ma jiraan.

   Wayna ka madaxbanaan tahay garsoorka sida laga dhawaajiyay, dastuurkaana qeexay garsoorku waxyaabuhuu ka kooban yahay oo ah maxkamadaha iyo Xeer-ilaaliyaha, ka mid maaha qareenku waa xirfadle, markaan eegno xirfadaas, maanta xeerkaa qareenada ee sameysani wuxuu ka sii qalafsanyahay xataa sidii shuuciga, wuxuu ahaa xeer aan la naaqishin, oo waajibaad farabadan oo ay ahayd in la ilaaliyo aanay ku jirin, mudanayaal wax ka-badalka xeerkan meelaha uu abaarayo waxa wanaagsan in laga eego, xaga madaxbanaanida Ururka iyo qofka qareenka ah waa in lagu daraa oo qof qareen madaxbanidiisa iyo la xisaabtankiisa uu taabanayaa oo uu shaqadiisa si wanaagsan , Wasiir ahaw ama xildhibaan ahaw ma jiro qof qareena oo awood dheerada leh, maxkamadaha hortoodana laguma kala duwana.

   Waxaa had iyo jeer la da-liishanaya waa laba arrimood marka laga hadlayo xildhibaanku ma noqon karaa qareen, mid waa ra'yi oo waxay leeyihiin qofkani wuxuu leeyahay immunity oo maxkamadu ma qaban karto, waa taasi ra'yi ku saleysan qaanuun maaha, kumana saleysna practicalka maxkamadaha waxyaabaha ka jira, sharciga cid ka

sareysaana ma jirto,, arrinka kale ee la adeegsanayaa waa **Qodobka 48aad F/2aad** ee dastuurka ee xildhibaanu danihiisa gaarka ah ugama faa'iideysan karo xilkiisa, waa sax haduu ka faa'iideysto waa danbi, qodob xeerka ciqaabta ka mida weeye, haduu awooda ku xad gudbo waa lagu dacweynayaa oo procedure bay leedahay loo maro, waana danbi ka baxsan mihnada, oo tan qareenimadu waa inuu qofku ka faa'ideysanayo mihnadiisa sida dhakhaatiirta, injineerka iyo waxaaba jira rag xildhibaano ah oo qandaraasyo qaata oo dawlada ka qaata ama hay'ado ka qaato, dee lama odhan karo maxaad uga qaadanaysaa, waxa kaliya oo la eegayaa inuu si sharci ah uga qaatay.

Xafiiska Xeer-ilaaliyaha guud ku xigeenadiisu garsoorka ayay ka midyihiin, sidoo kale gudida cadaalada ayuu ka tirsan yahay, waa xubinta kaliya ee dacwad ku oogi karta garsooraha maxkamadaha horteed, hadana dacwada wuu ka qeybqaataa oo wuu lagaa qareenka saameyna kuma yeesho, qofka xildhibaanka ah wax raada uu ku leeyahay ma jirto, xeer-ilaaliyihii eryay haduu lagalayo qof xildhbaana oo aan wax awood ku lahayni inuu la galo maxaa u diidaya, qareenku qof maxkamaha gudaheea maaha, xeer-ilaaliyhu sidoo kale oo waa dad sharciga yaqaan oo u hoogasamaya, hadii uu danbi gacanta lagalo waa la qaban karaa, waana laganaaxi karaa.

Websityada hadaad gasho oo aad eegto Xeerarka loyerada caalamka waxaad arkeysaa senateka mareykanka oo qareeno waaweyn ah, xirfadeyda maaha in la iiga hor istaago xildhibaan baan tahay, dhibaatada iminka jirta ee garsoorka waxa weeye waxaa is duljooga maxkamada, oo waxaa hooseya kii wax sixi lahaa, maxkamda gobolka waxaa hooseeya kii wax sixi lahaa ee aqoonta lahaa, imtixaanbaa laga qaadayaa qofkii shahaadada sitey ee aqoonta lahaa, waxaana ka qaadaya dad aan aqoon lahayn, magaranyo waxay ka qaadayaan, marka la leeyahay gudidda ka qaadeysa waa in qualificationkooda la raaciyaa oo la yidhaahdaa qof noocaas ah ayaa ka qaadaya, oo shuruudo lagu xidhaa.

Arrinka da'da qofka qareenka ah, anigu waxaa qabaa in laga weyneeyo intan oo lagaadhsiiyo ill 40 jir, waa qofku wuxuu jeedinayaa waa fadwo, inuu fadwo isku kharibta Somaliland oo madaxa isugalisa uu isla taago, waxaynu ka doorbideynaa inuu noqdo qof bisil oo waaya arragnimo leh shareecadana si fiican u yaqaan, hadii 15 jir loo daayo dee qolad aadka u dhereysaana way inoo soo galeysaa, sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in 30ka laga daayo oo 40 jir da'diisa laga dhigaa.

Arrinta kale ah, xubnaha gudiga ruqsad bixisa, way fiican tahay in madaxbanaani la siiyo oo ay awood u yeeshaan maamulka qareenada, markaa 5 xubnood ee la siiyay waxaan qabaa 2 in baarlamaanka laga keeno, oo xubin Wakiilada ah iyo Xubin Guurtida ah laga dhigo, 3 xubnood kalena, waxa kale oo aan soo jeedinaya ururka qareenada wasaarada kama tirsana, waa gudi aan wasaarada hoos iman, waa gudi national oo xeerkasi dhisey oo loo sameeyay inay nidaamiso qareenada, oo sideeda u taagan, wada shaqeyn iyo isku xidhanan bay leeyihiin, sida hay'ada garsoorku wasaarada cadaalada aanay uga midka

ahayn, laakiin xidhiidhka ka dhaxeyn kara dastuurkaa qeexaya, inkasto iminka laga dhigay Wasaarada Cadaalada iyo Garsoorka, sidaa darteed waa inaan qeexnaa oo nidhaahnaa waa hay’ad u taagan Maamulka iyo nidaaminta Xirfadlayaasha qareenada.

Arrinta kale ee mudanihii iga horeeyay taabtey oo xeerkan ka maqan ayaa jira, waxaa jirey legal verb wax la yidhaahdo oo waa xafiis darsi-kara sharciga oo xeerarka dalka wixii ka khaldan eegi-kara, oo dastuurka dalka darsi kara, sidoo kalena xeerar soo curin kara, kaas oo isugu tageen ururo badan oo uu leeyahay shakhsi ama shakhsiyaad ka badan, waa inaan ku darnaa xeerka.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- Si xeerkan u shaqeeyo oo xirfadlayaasha qareenada u maamulo waa lagama maarmaan in la meel-mariyo xeerka, sidoo kale cid isku duba rida in loo sameeyo oo xeerka waxyaabaha kale ee ka dhiman loogu soo daro ayaan codsanaya, Gudidda Garsoorkaba ha noqotee, waad mahadsantihiin.

| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
|---|---|
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ---------------------------------------------------------- | ---------------------------------------------- |